ne.ch
RÉPUBLIQUE ET CANTON DE NEUCHÂTEL

# KOR UQAADIDA CAAFIMAADKA LAGA BILAABO DHALINTA YAR

MACLUUMAAD LOOGU TALAGALAY WAALIIDKA HEEYSTA ILMAHA DA'DA YAR

PRÉVENTION ET PROMOTION DE LA SANTÉ

# FAA'IIDOOYIN AMA NUXUR


**BUUG YAR WAXAA LOOGU TALA GALAY WAALIDIINTA HEYSTA ILMAHA YAR 4**

**UUR QAADID 6**

Xarunta caafimaadka galmada -qorsheynta qoyska 7
Dhaqtarka dumarka 8
Waxyaalo kale 8

**IN LAGULA SOCDO XILIGA UURKA IYO DHALMADA 9**

Umuliso 10
RHNe – Qeybta dhalmada 11
Guriga lagu dhalo 12

**ISDHAAFSI HADAL , WADAKULAN IYO HELID TALO 13**

Croix-Rouge neuchâteloise , Le Patio 14
Ururka WaaliDiinta Da'da yar 15
La Trottinette 15
La Courte-Échelle 16
Info-Entraide 16
EPER – Espace Parents 17
Croix-Rouge neuchâteloise , Femmes-Tische et Hommes-Tische 18
RECIF 19
Adoptons-nous & Accueil familial 20

**IN AAN LASOCDO ARRIMAHA CAAFIMAADKA IYO KORNIISHAHA ILMAHA 21**

Pédiatres 22
Croix-Rouge neuchâteloise , La talinta kalkaalisada caruurta yar yar 22
Kuwa kale 23

**IN LAGAA CAAWIYO WAXBARASHADA , MASKAX AHAAN IYO DHIBAATOOYINKA BULSHO EE QOYSKA DHEXDIISA 24**

Office de protection de l'enfant 25
Fondation Carrefour , AEMO 26
Croix-Rouge neuchâteloise , daba-galka cilmi-nafsi waxbarasho 27
Xarunta Neuchâtelois ee dhimirka (CNP) 28
Xarunta neuchatel ee dhimirka , waxey latalisaa lamaanaha iyo qoyska 29
Xarunta neuchâtel dhimirka , Hagidda dhalaanka 30
CSP Neuchâtel , latalinta guurka iyo qoyska 31
Cilmi-nafsi , cilmi-nafsi-yaqaanada daaweeya 32
Psychiatres et pédopsychiatres 33

**IN LA IIHAYO ILMAHEYGA IYO CAAWIN AAN UHELO SHAQADA GURIGA** 34
Croix-Rouge neuchâteloise , Adeega daryeelka ilmaha ee guriga 35
Croix-Rouge neuchâteloise , Ilmo heynta 36
Daryeelka qoysask 37
Xafiiska u qaabilsan qoysaska ilmoheynta Iyo macadka waxbarashada gaarka ah (OSAE) 37

**HELID CAAWIN HADDII GEERI DHACDO** 38
As'trame 39
Agapa Suisse-Romande 40
Notre petite parenthèse 40

**XAALAD ADAG JIRTO** 41
Hadi dhib jiro wac lambarkan 144 42
Khadka taleefanka 42
Autres numéros d'urgence 42

**CINWAANO KALE OO MUHIIM AH** 43
Wakiilka dhaliyarada – SPAJ 44
Caafimaadka maskaxda 44
L'Éducation donne de la force – Neuchâtel 44

# BUUG YAR WAXAA LOOGU TALA GALAY WAALIDIINTA HEYSTA ILMAHA YAR

Gobolka Neuchâtel, waxaa siwadajir isaga kaashaday ururo kaladuwan si ay kor ugu qaadaan caafimaadka ilmaha da'dooda udhaxeyso 0 à 4 jir. Waxey bixiyaan adeegyo kaladuwan oo loogu talagalay waalidka hadii ay qabaan su'aalo kusaabsan kornii-shaha xaga caafimaadka iyo waxbarashada caruurtiina.

Waaxda caafimaadka dadweynaha ayaa soosaartay buugan yar si ay ugu fududeeyso waalidiinta raadinta aqbaarta muhiimka ah ee laxiriira caafimaadka ilmaha yara. Waxaan aad ugu farax sanahay inaad uhelidoontid waqti aad ku aqriso bugaan waxaana rajeyneynaa inuu ku anficidoono! Dhamaan faa'iidooyinka iyo adeegyada lagu soo bandhigay buugaan yar waa mid qof walba uu helikaro. Waxaa kaloojira adegyo kale taasoo hadaad ubaahantahay aad kahelikartid dhaqtarkaaga iyo xafiiska badbaadada ilmaha.

- Buugaan yar wuxuu kuqoran yahay af faransiis iyo luuqado kale. Waa dalbankartaa ama daabacankartaa isticmaal siitkan https://www.ne.ch/autorites/DFS/SCSP/prevention/Pages/Petite-enfance.aspx

- Waaxda caafimaadka bulshada masuul kama ahan waxyaabaha aysoo bandhigaan ururada ku cayiman buugan Sidaa darteed waxqabadka ururadan wax shaqo kuma lahan waaxda caafimaadka bulshada.

# UUR QAADID

# XARUNTA CAAFIMAADKA GALMADA -QORSHEYNTA QOYSKA

**ADEEGAN ANIGA AYUU IQUSEEYAA TUSAALE AHAAN HADDII**
- → Aan qabo su'aalo laxiriira galmada
- → Aan raadinaayo daawada kahortaga ilmaha
- → Aan ubaahnahay caawin degdeg ah oo laxiriirta nolosheyda xaga galmada

Xarunta caafimaadka galmada waxey bixisaa aqbaar, kawarqab iyo caawin wixii laxiriira su'aalha caafimaadka galmada. Qofkasta ayay ufurantahay, kaligaa waad imaankartaa ama lamaanahaaga waad la imaankartaa.Wadahadalka waa bilaash waana qarsoodi.

**MOWDUUCYADA LAGA HADLAY**
- → Galmada
- → Kahortaga ilmaha
- → Uur aad fileysay ama mid kadis aad kuqaa-day
- → Cuduradda laga qaado galmada
- → Wacyi galin galmada
- → Dhib xaga qoyska
- → Bacrimiyey
- → Talooyinka waa bilaash (adegyada qaar-kood waa lacag)

**À NEUCHÂTEL**
Rue Saint-Maurice 4
- → 032 717 74 35
- → www.sante-sexuelle-ne.ch

**À LA CHAUX-DE-FONDS**
Rue de la Serre 14
- → 032 967 61 87
- → www.chaux-de-fonds.ch/sante-sexuelle

# DHAQTARKA DUMARKA

**ADEEGAN ANIGA AYUU IQUSEEYAA TUSAALE AHAAN HADDII**
- → Uur aan yeesho
- → Ubaahdo lasocod caafimaad,talo iyo caawin laxiriira uurka iyo dhalmada
- → Ubaahdo in la i jiheeyo si aan uhelo meelaha lagu dhalo
- → Raadiyo talooyin ku saabsan qeybta dumarka waxey ahaataba

Dhaqtarka dumarka wuxuu la kulmaa dumarka oo dhan wuxuuna kala hadlaa wixii kusaabsan caafimaadka galmada guud ahaan. Waxey kaaga jawaabayaan su'aal-ha laxiriira galmada,ugxamaha,baaris, waxey kaloo kusiinayaan daaweyn xiliga aad uurka yeelatid ilaa bilha sooraca. Dhaqtarka dumarka wuxuu kaloo awood uleeyahay inuu kula xiriirsiiyo dhaqaatiir kale haddii ay kugu timaado cilad dhalmo la'an ah si ugxantaada loobaaro RHNe

**MOWDUUCYADA LAGA HADLAY**
- → Baaris
- → Dabagal caafimaad
- → Uurka
- → Kahortaga uurka
- → Caadada oo wareerto
- → Dhalmo deys noqotid
- → Dhalmo la'aan

**FAYLKA DHAQTARKA HAWEENKA EE GO-BOLKA NEUCHÂTEL**
- → http://www.snm.ch/index.php/component/comprofiler/userslist/42-liste-gyneco-logie-obstetrique

**SOCIÉTÉ SUISSE DE GYNÉCOLOGIE ET D'OBSTÉTRIQUE**
- → 031 313 88 55
- → www.sggg.ch/fr/

# WAXYAALO KALE

Waxaa jira adeegyo kale oo laxiriira mowduuca uur qaadista,qaasatan sida qey-bta ugxanta baarta ee isbitaalka kasoo loogudbiyo lamaanaha rabo in ay jawaab uhelaan su'aalaha kusaabsan dhal la'aanta. Dhaqtarkaaga latasho hadii ay ciladaas jirto.

# IN LAGULA SOCDO XILIGA UURKA IYO DHALMADA

# UMULISO

**ADEEGAN ANIGA AYUU IQUSEEYAA TUSAALE AHAAN HADDII**
- → Uur aan leeyahay
- → Aan ubaahanahay inaan isudiyaariyo dhalitaanka ilmaha
- → Aan dhalay iyo waxaan rajeynayaa inaan helo caawin guriga xagiisa iyo ilmaha dhashay
- → Aan qabo su'aalo laxiriira naasnuujinta
- → Aan ubaahnahay qof aan lahadlo oo qibrad uleh caafimaadka

Umulisada waxey dhiibtaa caawin,talo iyo xanaaneyn dumarka xiliga ay uurka leeyihiin, xiliga dhalmada iyo dhalmadda kadib. Waxey uhowlan yihiin kawarqabka uurka iyo haduu jiro uur qatar keeni kara, iyo isku diyaarinta dhalmada. Kawarqabka waalidka wuxuu soconayaa isbitaalka kadib si waalidka uhelo talo ku saabsan laqabsashada hooyada, aabaha walaalaha , si ay ulaqabsadaan ilmaha markaa dhashay. Waxey kaloo taageero siiyaan naasnuujinta, daryeel caafimaad iyo mid nadaafadeed. Waxey kaloo bixiyaan casharo kusaabsan (masaajeen, xambaarid, iwm.) Umulisooyinka waxey ku dhaliyaan isbitaalada iyo guryaha.

**MOWDUUCYADA LAGA HADLAY**
- → Uur
- → Dhalasho
- → La talinta uurka
- → Uurka qatarta wata
- → Isku diyaarinta dhalmada
- → Dhalitaan
- → Dhalitaan kabacdi
- → Naasnuujin
- → Taageerid waalidka

- → Ugu badnaan adeegyadaan waxaa bixiya lacagta caymiska caafimaadka

**DHALIS, URURKA NEUCHÂTELOISE UMULISOOYINKA GURYAHA**
- → 079 280 48 28
- → www.ne-sens.ch

**FÉDÉRATION SUISSE DES SAGES-FEMMES**
- → 031 332 63 40
- → info@sage-femme.ch
- → www.sage-femme.ch

# RHNE – QEYBTA DHALMADA

**ADEEGAN ANIGA AYUU IQUSEEYAA TUSAALE AHAAN HADDII**

- → Uur aan leeyahay
- → Aan ubaahanahay talo iyo caawin laxiriira uurka iyo dhalmada
- → Aan raadinayo meel lagu dhalo
- → Aan ubaahanahay inaan laxiriiro qof qibrad uleh ilmaha markaa dhasha

Inta aad uurka leedahay,isbitaalka qeybta dhalmada waxey bixiyaan talooyin laxiriira uurka,isku diyaarinta dhalitaanka, iyo hadaad ubaahatid xanuun la'aan inaad foolatid. Si aad uheshid intaan soo sheegnay umuliso ayaa balan kusiin si ay kuugu sharaxdo. Waxaa kaloo dhacda in haddii xalada qoyska kugu adagtahay in fiiro gaar ah laguuyeesho oo lagaa warqabo, xitaa guriga laguugu yimaado xiliga dhalmada kadib.

**MOWDUUCYADA LAGA HADLAY**

- → Uurka
- → dhalasho
- → La talin qaas ah
- → Masaajeen
- → Ku dhalid waaskada biyha dhexdeeda
- → Casharo

**RÉSEAU HOSPITALIER NEUCHÂTELOIS**
Pourtalès, Maladière 45
2000 Neuchâtel

- → 032 713 33 07
- → https://www.rhne.ch/maternite

# GURIGA LAGU DHALO

**ADEEGAN ANIGA AYUU IQUSEEYAA TUSAALE AHAAN HADDII**
- → Uur ayaan leeyahay
- → Waxaan ubaahnahay talo iyo caawin markaan uurka leeyahay ama dhalaayo
- → Waxaan ubaahanahay inaan lahadlo qof qibradle kalsooni naleh si aan wax uga weydiiyo ilmaha markaa aan dhalay

Waa guri loogu talagalay inlagu dhalo oo sida isbitaalka qeybta dhalmada oo kale, qaab-dhismeedka noocaan oo kale. waxaa lasocda xili kasta ah oo suurtogal kad-higayo in la dejiyo qorshe fududeeynayo ku dhalitaanka guriga ee shaqsi ahaaneed. La maanaha waxaa xilikasta lasocda umulisooyin inta uurka dhalista,iyo dhalitaanka kabacdi, waxaa kaloo loo bandhigaa casharo sida iskudiyaarinta dhalmada, caafi-maad daro hadeyjirto, xanuun la'aan say kufoolankarto.Guriga waxaa kudhalikaro oo kaliya dumarka aan wax dhibaato caafimad aan qabin oo kaliya.

**MOWDUUCYADA LAGA HADLAY**
- → Uur
- → Dhalasho
- → Lasocod qaas ah
- → Casharo
- → Yoga
- → Acuponcte
- → Masaajeen
- → Masaajeen lagu yareynayo xanuunuka
- → Caafimaad darro

**MAISON DE NAISSANCE TILIA**
Chemin des Valangines 9
2000 Neuchâtel
032 724 12 23
- → info@tilia-naissance.ch
- → www.tilia-naissance.ch

# ISDHAAFSI HADAL, WADAKULAN IYO HELID TALO

# CROIX-ROUGE NEUCHÂTELOISE, LE PATIO

**ADEEGAN ANIGA AYUU IQUSEEYAA TUSAALE AHAAN HADDII**
- → Ilmaheyga uu jiro inta udhaxeyso 0 ilaa 4 jir
- → Aan ubaahnahay inaa lasheekesto waalidyo kale
- → Aan rabo inaan laqeybsado qibradeyda ama walwalkeyga

Le Patio Laanqayrta Cas ee neuchâtel waa meel ay ku kulmaan waalidiinta heysta ilmaha da'dooda udhaxeyso  0 ilaa 4 jir iman karan si ay uwadaagan waayo aragnimadooda,su'aalaha ayqabaan jawaab ugu helaan iyo haddey cabsi qabaan xaga korniishaha ilmahooda. Waxaa jira barnaamij (Ubaahan isqorid ) aad kahelikartid mowduucyo kaladuwan oo laxiriira korniishaha ilmaha iyo waalidnimada.

**MOWDUUCYADA LAGA HADLAY**
- → Isdhaafsi
- → Qibrad wadaag
- → Talo
- → Cunto
- → Waxbarasho
- → Qoyska
- → Hormarin

- → Adeegaan waa bilaash
- → 032 886 88 60
- → puericulture@croix-rouge-ne.ch
- → www.croix-rouge-ne.ch/services/le-patio/

# URURKA WAALIDIINTA DA'DA YAR

**ADEEGAN ANIGA AYUU IQUSEEYAA TUSAALE AHAAN HADDII**
- → Aan ahay qof dhalin yar oo waalid noqday da'diisuna(kayartahay 25 jir)
- → Aan ubaahnahay inaan fikrado isdhaafsano waalidiin da'deyda oo kale
- → Aan ubaahnahay talo iyo jiheeyn
- → Aan ubaahnahay caawin iyo talo si aan dib ugu noqdo waxbarashadeydii

Ururka Waalidiinta Da'da yar waxey bixiyaan caawin iyo talo ay ugu talagaleen waalidiinta da'da yar. Waxey suuragalineysaa wadakulanka iyo hadal isdhaafsi ayadoo usoojeedineyso caawin iyo talooyin qaas ah sidookale waxey ulasoconeysaa si ay waxbarashadii ama shaqadii ay kujirtay dib ubilaawdo.

**MOWDUUCYADA LAGA HADLAY**
- → Uur
- → Hooyo dayar
- → Aabe dayar
- → Ilmo iska sooxaaqid
- → Taageero tababar
- → Digtoonaan
- → Qibrad wadaag
- → Iskaalmeyn

**ASSOCIATION JEUNESPARENTS**
- → 077 474 73 37
- → contact@jeunesparents.ch
- → jeunesparents.ch

# LA TROTTINETTE

**ADEEGAN ANIGA AYUU IQUSEEYAA TUSAALE AHAAN HADDII**
- → Ilmaheyga uu jiro inta udhaxeyso 0 ilaa 4 sano
- → Aan raadinayo meel dhageysi, idhaafsi, cayaar
- → Aan rabo inaan waqti laqaato ilmaheyga

waa meel ayku kulmaan ilmaha da'dooda tahay 0 à 4 jir oo ay sooraacaan qofweyn sida (waalid, awoowe iyo ayeeyo, eedo habo, iwm.). waxaa layimaadaa isqorisla'aan muhiimadda waa in ilmaha ayhelaan ilmo ayladheelaan, lahadlaan, waalidkana ay lasheekeeystaan waalidyo kale iyo dad kutaqsuusay ilmaha iyo waalidka latalinta.

**MOWDUUCYADA LAGA HADLAY**
- → Kusoodhaweyn waalidka iyo ilmha
- → Lasocosho
- → Dhageeysi
- → Isweydaarsi

**ASSOCIATION LA TROTTINETTE**
Rue de la Serre 24
2300 La Chaux-de-Fonds
- → 032 914 52 60
- → info@association-la-trottinette.ch
- → http://www.association-la-trottinette.ch

# LA COURTE-ÉCHELLE

**ADEEGAN ANIGA AYUU IQUSEEYAA TUSAALE AHAAN HADDII**
- → Ilmaheyga uu jiro inta udhaxeyao 0 ilaa 5 jir
- → Waxaan raadinayaa meel dhageysi,isdhaasi iyo cayaar
- → Waxaan rabaa waqti laqaato ilmaheyga

Waa meel ilmaha loogutalagalay da'doodana tahay 0 ilaa 5jir waana inuu lasocdo qofweyn . ilmaha wuu ku dheelikaraa, boodboodikaraa,hadlikaraa,wax masawiri-karaa inta ilmaha ay cayaarayaan waalidka lasocda wuxuu fursada uhelayaa inuu lasheekeysto waalidiinta kale iyo dadaka kashaqeeya meesha ee qibradda uleh heynta ilmaha wuxuuna weydiinkaraa su'aalha kusaabsan ilmaha korniinshahooda.

**MOWDUUCYADA LAGA HADLAY**
- → Soodhoweyta waalidka iyo ilmaha
- → Lasocosho
- → Dhageeysi
- → Isweydaarsi

**LA COURTE-ÉCHELLE**
Rue des Fausses-Brayes 3
2000 Neuchâtel
- → 032 724 45 15
- → info@lacourteechelle.ch
- → www.lacourteechelle.ch

# INFO-ENTRAIDE

**ADEEGAN ANIGA AYUU IQUSEEYAA TUSAALE AHAAN HADDII**
- → Aan raadinayo koox taageero ah
- → Aan rabo inaan lakulmo dad qaba tabashooyin lamid ah taan qabo
- → Aan ubaahnahay inaan dareemo taageerada mowduucyada isaameeya

Waa barta xiriirka iyo isuduwida dhamaan su'aalaha la xiriira is-xilqaanka kaalma wadaaga ee gobolka Neuchâtel. Waxey isku keentaa dadka kujira xaalad iskumid ah, inta badan waxey isuguyimaadaan qaab kooxeed kuwaasoo isugu yimid ujeeda-daduna tahay in la is caawiyo,la is weydaarsado xalalka iyo ururinta macluumaadka.. waxey isuqeybiyaan koox ahaan kooxahaas oo kahadla mawduucyada kalaha caafi-maadka maskaxda ama bulshada, qaarkood wuxuu quseeyaa waalidka dhalinta yar : dhalista ilmaha dhiciska, qoysaska kaliga ah,waalidiinta heysta ilmaha xasaasiyada leh,cuduro dhif ah, intaan waa qeyb kamid ah inteey qabtaan.

**MOWDUUCYADA LAGA HADLAY**
- → Iscaawin
- → Isweydaarsi
- → Tababar
- → Isku xiriirinta
- → Kooxda hadalka
- → Taageero

**INFO-ENTRAIDE SUISSE ANTENNE NEUCHÂ-TEL**
- → 032 724 06 00
  076 549 26 06
- → info@infoentraideneuchatel.ch
- → www.infoentraideneuchatel.ch

# EPER – ESPACE PARENTS

**ADEEGAN ANIGA AYUU IQUSEEYAA TUSAALE AHAAN HADDII**

- → Raadinayo dhageysi iyo caawin xaga maamulka xafiisyada ee maalinlaha ah
- → Raadinayo  xirfado aan lasameeyo ilmaheeyga
- → Rajeynayo inaan helo meel wada kulan iyo wax isdhaafsi

Degaanka waalidka waa meel dhageysi, talo,iyo jiheeynta waalidka. Waxey ujeedadoodu tahay in la kordhiyo madaxbannanida iyo isku kolsoonida,laxoojiyo aqoonta waalidka iyo tan bulshada iyo kor uqaadida isdhexgalka. Sadex qaybood oo waxqabad ah ayaa la soo jeediyay : dhageysi cilmi nafsiga iyo taageerid xaga maamulka,howlaha waalidka, ilmaha iyo sidookale aqoon-isweydaarsiyada macluumaadka ee waalidiinta ugu danbeyntii waxqabadyada waxaa loogutalagalay xoojinta xirfadaha aasaasiga ah ee goobta dhijitaalka ah.

**MOWDUUCYADA LAGA HADLAY**

- → Dhageysi iyo talo
- → Taageerada maamulka
- → Ku hadalka fransiiska
- → Kulan iyo isweydaarsi
- → Waqti qaadasho waalidka iyo ilmaha
- → Aqbaarsiin waalidka
- → Isweydaarsi iyo aqbaarsiin aabaha
- → Xirfadaha kombiyuutarada

- → Adeegan waa bilaash

**EPER, ESPACE PARENTS**
Ch. Des Valangines 97
2000 Neuchâtel

- → sophie.sarr@eper.ch
- → 078 936 44 78
- → https://www.eper.ch/project-explorer/espace-parents

# CROIX-ROUGE NEUCHÂTELOISE, FEMMES-TISCHE ET HOMMES-TISCHE

**ADEEGAN ANIGA AYUU IQUSEEYAA TUSAALE AHAAN HADDII**
- → Aan ahay qof gobolka hada yimi cidlana dareemaya
- → Aan jeclaan lahaa wada hadal kusaabsan xaga waxbarashada iyo caafimaadka ilmaheyga
- → Aan rabo talooyinka hooyooyin kale ama abayaal kale

Wada kulanka Femmes-Tische iyo  Hommes-Tische waxaa isuguyimaada 8 ilaa 10 dumar ama rag kuwaasoo raba iney kahadlaan xoojiyaan si wadajir ah luuqadooda hooyo  aqoontooda iyo xirfado iyo Mocduucyo muhiim u ah caafimaadkooda  iyo tan qoyskooda, si ay uhormariyaan waxbarashada caruurtooda,isdhexgalka,iyo la-qabsashada nolosha maalinwalba.

Wadakulankaan xitaa waa fursad abuureysa inlaxiriiro,la ismaqlo, lakala faa'iideysto, fikradaha la isweydaarsado,. Laanqeyrta bisha cas waxey kaloo sameynkartaa ba-lan gurigaaga ah hadii loobaahdo.

**MOWDUUCYADA LAGA HADLAY**
- → Laxiriirida hooyooyin kale iyo aabayaal kale
- → Aqoonsanaanta bixinta ilmaha iyo waa-lidka
- → Isweydaarsi
- → Dhageysi
- → Laxiriirka bulshada dumar ahaan ama rag ahaan

- → Adeegan waa bilaash

**FEMMES-TISCHE, CROIX-ROUGE NEUCHÂTEL**
**HOMMES-TISCHE, CROIX-ROUGE NEUCHÂTEL**
- → 032 886 88 60
- → contact@croix-rouge-ne.ch
- → www.croix-rouge-ne.ch/services/femmes-tische/
  www.croix-rouge-ne.ch/services/hommes-tische/

# RECIF

**ADEEGAN ANIGA AYUU IQUSEEYAA TUSAALE AHAAN HADDII**
- → Aan dumar ahay
- → Aan rabo inaan helo aqoon wax ku ool ah igana caawineyso isdhexgalka
- → Aan rabo inaan sameeyo xiriir saaxiibtinimo iyo mid bulsho

RECIF Ujeedadiisu waxey tahay  iney taageerto une fududeeyso dumarka soogalootiga ah iyo caruurtooda iyo sidookale in la dhiiri geliyo wada kulanka iyo isweydaarsiga dumarka kasoojeeda wadamo kala duwan. Sadex wax ayay soo jeediyeen : howlaha tababarka,xirfado ilmaha loogu talagalay, iyo meel lagu ciyaaro,lagu kulmo iyo la isku aqoon weydaarsado. Taasi waxey suurogalineysa in dumarka ayka qeybqaataan, RECIF waxey kaloo sameeyeen meel ilmaha lagu siihayo  inta aad adiga waxbarashada kujirtid waana bilaash.Taas oo fududeyneyso in ilmaha jira 4 bilood ilaa 4 sano lasii qabsadaan bulshada luuqda faransiiska sii fahmaan.

**MOWDUUCYADA LAGA HADLAY**
- → Tababar
- → Ilmaha oo lahayo xiliga casharka socdo
- → Luuqada faransiiska
- → Dhexgalka bulshada
- → Wada kulan iyi hadal isweydaarsi

- → Adeega ilmo heynta waa bilaash

**À NEUCHÂTEL**
Rue de la Cassarde 22
- → 032 730 33 50
- → 2000@recifNE.ch
- → www.recifne.ch

**A LA CHAUX-DE-FONDS**
Rue du Doubs 32
- → 032 968 62 42
- → 2300@recifNE.ch
- → www.recifne.ch

# ADOPTONS-NOUS & ACCUEIL FAMILIAL

**ADEEGAN ANIGA AYUU IQUSEEYAA TUSAALE AHAAN HADDII**

- Aanrabno inaan korsono ilmo
- Aan rabno inaan noqono qoysaska ilmaha haya
- Aan rabo inaan ogaado akhabadda ayleedahay arimaha korsashada

Ururka looyaqaano Adoptons-nous wuxuu bixiyaa meel dhageysi iyo caawin waalidiinta kahor iyo kadib ilmo korsashada. Waxey faafisaa agebka iyo aqoonta kuxeeran mowduucan iyadoo la abaabulaayo aqoonta kuxeeran mowduucan iyadoo la abaabulayo aqoon-isweydaarsiyo, kooxo dood wadaag ah,shirar iyo tababar. Koox cilmi nafsiyeedyo badan ayaa waxey bixiyaan talooyin kuna bixiyaan xarunta d'Adoption et d'Accueil Familial ee kutaala Peseux..

**MOWDUUCYADA LAGA HADALAY**

- Korsashada
- Soodhaweyn qoyska
- Lifaaq iyo dhaawac hore
- Korsashada caadiga
- Dareen la'aan
- Dhageysi
- Caawin
- Aqbaar
- Isweydaarsi

**CENTRE ADOPTONS-NOUS & ACCUEIL FAMILIAL**

Route de Neuchâtel 39
Peseux

- 076 451 99 15
- info.centreaa@gmail.com
- www.adoptons-nous.ch

# IN AAN LASOCDO ARRIMAHA CAAFIMAADKA IYO KORNIISHAHA ILMAHA

# PÉDIATRES

**ADEEGAN ANIGA AYUU IQUSEEYAA TUSAALE AHAAN HADDII**
- Ilmaheyga uu qabin dhaqtar lasocda
- Ilmaheyga uu jiran yahay
- Aan aqoon qofka aan weydiiyo dhib haduu jiro xaga ilmaha

Dhaqtarka caruurta waa khabiirka tixraaca caafimaadka ilmaha.wuxuuna lasocdaa in mudo ah oo dhalisa kalsooni.Haddi ubaahatid, hakabaqin inaad weydiiso su'aa-laha aad qabtid.

**MOWDUUCYADA LAGA HADLAY**
- Caafimaadka
- Korniishaha
- Jirada
- Dhaawaca
- Kawarqb ama lasocod

**LIISKA MAGACYADA DHAQAATIIRTA ILMAHA GOBOLKA NEUCHÂTEL**
- http://www.snm.ch/index.php/profil/userslist/7-liste-des-pediatres

# CROIX-ROUGE NEUCHÂTELOISE, LA TALINTA KALKAALISADA CARUURTA YAR YAR

**ADEEGAN ANIGA AYUU IQUSEEYAA TUSAALE AHAAN HADDII**
- Waxaan u baahanahay talo ku saabsan daryeelka ilmaha
- Waxaan qabaa su'aalo kusaabsan nafaqada iyo korrinka ilmaha
- Waxaan jeclaan lahaa kawarqab xaga ilmaha

La talinta kalkaasida ilmaha yaryar ayaa waxey diyaar uyihiin si ay u taageeraan unala socdaan ilmaha 4ta sano ee ugu horeeyso noloshooda. Talooyin iyo caawin ayaan siinaa waalidiinta cusub oo kusaabsan korniishaha ilmaha, cuntadda ama hurdada ilmaha. Waalidiintu waxey sidookale helaan caawimaad ku haboon xaala kasta oo qoys iyo macluumaadka tallaabooyinka kahortaga caafimaadka.

**MOWDUUCYADA LAGA HADLAY**
- Daryeel
- Naasnuujin
- Cunto
- Hormarinta maskaxda
- Hurdo
- Oohin
- Nolosha qoyska

- Adeega waa bilaash
- 032 886 88 60
- puericulture@croix-rouge-ne.ch
- www.croix-rouge-ne.ch/services/consultations-infirmieres-petite-enfance

Latalin taleefan, email ahaan ama aad xarunta (cinwaanada waxaad kahelikartaa interneedka laankheyrta Croix-Rouge neuchâteloise).

# KUWA KALE

Waxaa jira, adeegyo kale oo gobolka ka jira kuwaas ood weeydiin kartid su'alaha laxiriira horumarka ubadkaaga. Gaar ahaan sida xarunta cilmi nafsiga iyo addeega waxbarasho ee socdaalka,dhaqtarkaaga caruurta ayaa halkaas  kuu diri kara haddii loo baahdo.

# IN LAGAA CAAWIYO WAXBARASHADA, MASKAX AHAAN IYO DHIBAATOOYINKA BULSHO EE QOYSKA DHEXDIISA

# OFFICE DE PROTECTION DE L'ENFANT

**ADEEGAN ANIGA AYUU IQUSEEYAA TUSAALE AHAAN HADDII**
- → Aan heysto dhibaatooyin xagga waxbarashada ama bulsheed ee ilmaheyga
- → Ilmaheyga uu la ildaran yahay xidhiidh qoys oo adag iyo isfahan la'aan

Xafiiska badbaaddada ilmaha wuxuu bixiyaa caawin kawarqab qoysaska lakulma dhibaato xaga waxbarasho ama bulsho, qaab dabagal ama ikhtiyaari ah. Sidoo kale waa xarunta latalinta gobolka ee dhamaan su'aalaha ku saabsan xadgudubka carruurta. Waxey u wareejin kartaa waalidiinta adeegyo waxbarasho oo karti leh iyadoo ku xiran xaalada gaarka ah ee qoyska. Waa suuratogal in la helo macluumaadka iyada oo aan lafurin fayl daruuri ah.

**MOWDUUCYADA LAGA HADLAY**
- → Dhibaato waxbarasho
- → Dhibaato bulsho
- → Xiriirka qoyska adag
- → Korsashada iyo aqoonsi
- → Arrimaha horumarinta
- → Jiro maskaxeed ama kor xanuun
- → Meeleyn
- → Xadgudub

- → Adeega waa bilaash

**LITTORAL EST – VAL-DE-RUZ**
Faubourg de l'Hôpital 36
2000 Neuchâtel
- → 032 889 66 40
- → opene@ne.ch

**LITTORAL OUEST – VAL-DE-TRAVERS**
Quai Philippe Godet 5
2000 Neuchâtel
- → 032 889 86 65
- → opeb@ne.ch

**MONTAGNES NEUCHÂTELOISES**
Rue du Rocher 7
2300 La Chaux-de-Fonds
- → 032 889 66 45
- → opec@ne.ch

- → https://bit.ly/protection-enfant

# FONDATION CARREFOUR, AEMO

**ADEEGAN ANIGA AYUU IQUSEEYAA TUSAALE AHAAN HADDII**

- Aan kala kulmo ilmaheyga dhibaato waxbarasho, xiriirka bulshada
- Aan rabo inaan ka fikiro baahiyaha ilmaheyga oo aan helo habab aan kudaboolo
- Ilmaheyga uu ubahanyahay in lalasocdo iyo lana caawiyo korniishihisa
- Ilmaheyga u jiro da'da udhaxeys 0 ilaa18 jir

L'AEMO ururkan wuxuu lahadlayaa waalidkasta iyo ilmahooda da'dooda udhaxeyso, 0 ilaa 18 jir, lakulma dhibaato waxbarasho,iyo xiriirka bulshada kuwaasoo ubaahan caawin waalidnimo oo kusaleysan nolosha joogtada ah. L'AEMO waxey caawiyaan waalidka si ay u aqoonsadaan una fahmaan baahida ilmaha si korloogu qaado korniishaha maskax ahaan iyo jir ahaan,saameyna ku leh iyo bulshadeed iyadoo laxoojinaayo xirfadaha waxbarasho ee waalidiinta iyo ilaalinta xiriirka waalidka iyo ilmaha. Waxey dhiibtaa kulan joogto ah oo guryaha, iyo banaanka ama xaruntooda muddo go'an.

**MOWDUUCYADA LAGA HADLAY**

- Dhibaatooyinka warbarasho
- Dhibaatooyinka qoyska
- Dhibaatooyinka bulshada iyo xiriirika
- Caawinta waalidka
- Taageero waxbarasho ee bukaan socodka
- Goobta hadalka ee waalidka iyo ilmaha

- Adeega dadweynaha loo fidiyo

**AEMO, FONDATION CARREFOUR**

**AEMO LITTORAL, VAL-DE-RUZ ET VAL-DE-TRAVERS**

Rue de la Fontaine 4
2034 Peseux

- 032 886 89 11
- aemo@ne.ch

**AEMO LA CHAUX-DE-FONDS, LE LOCLE, VALLÉES DE LA SAGNE ET DES PONTS-DE-MARTEL**

Léopold-Robert 51
2300 La Chaux-de-Fonds

- 032 886 88 99
- aemo.cdf@ne.ch

- http://www.fondation-carrefour.net/?page_id=19

# CROIX-ROUGE NEUCHÂTELOISE, DABAGALKA CILMI-NAFSI WAXBARASHO

**ADEEGAN ANIGA AYUU IQUSEEYAA TUSAALE AHAAN HADDII**

- Aan lakulmo dhibaato xaga waxbarasho ee ilmaha
- Qoyskeyga haduu kujiro xaalad adag oo laxiriira waalidnimada
- Aan ubaahnahay inaan xoojiyo xirfadaha waalidnimo oo aan sooceliyo xidhiidhka ilmaha
- Aan kujiro xaalad tahrib iyo waxana iheysta dhibaato laqabsi la'aan

Dabagalka cimi-nafsiga waxbarasho wuxuu bixiyaa taageero caruurta udhaxeysa 0 ilaa18 jir (iyo kaweyn) iyo qoysaskooda. Ayadoo dalabaadka uu ka imaanayo waalidka ama qofka qibrada uleh cilmi nafsiga ayaa yimaada guryahayha qoysaska. Faa'iidadaan waxaa lasiiyaa qoysaska lakulma dhibaatooyinka isdhexgalka, laqabsiga dhaqanka, qoyska, waxbarashada,bulshada, dareenka,xiriirka ama dhib. Qoladaan kutaqsuustay cilm-nafsiga waxbarashada waxey la shaqeeyaan dhamaan xubnaha qoyska si ay ufahmaan dhibaatooyinkooda si ay wadajir u raadiyaan habab lagu saxo iyo qalab si ay ugu suurtagasho iney helaan shaqo kufilan jawi qoys oo wacan.

**MOWDUUCYADA LAGA HADLAY**

- Isdhexgal
- Laqabsashada dhaqanka
- Waxbarasho
- Dhibaatooyinka iskuulka
- Dhibaatooyinka maskaxda
- Dhibaatooyinka bulshada
- Isgaarsiinta
- Dareen
- Xiriirka
- Gacan kahadal

- Adeegaan waa bilaash
- 032 886 88 60
- spe@croix-rouge-ne.ch
- https://croix-rouge-ne.ch/services/suivi-psycho-educatif/

# XARUNTA NEUCHÂTELOIS EE DHIMIRKA (CNP)

**ADEEGAN ANIGA AYUU IQUSEEYAA TUSAALE AHAAN HADDII**
- → Aan u baahanahay caawin si aan ilmaheyga ama aniga udareeno fiicnaan
- → Ilmaheyga uu kamuuqdo calaamadaha xanuunka maskaxda

Xarunta Neuchâtelois ee dhimirka waa xarunta tixraaca ee dhammaan arrimaha la xiriira caafimaadka dhimirka. Waa sida aan u aadno dhakhaatiirta ama kan ilmaha marka xanuun jirka ah jiro, waa macquul inaad heshid si dabeeci ah caawin kusaabsan caafimaadkaga qeybta madaxa. Haddaba hakawelwelin inaad caawin weydiisato hadaad ubaahato.

Waaxda dhimirka ilmahs iyo dhalinyarada CNP qaasatan ilmaha jira 0 ilaaa 18 jir iyo waalidkooda. Waxey siisaa daryeel balaaran oo loogu talagalay caruurta la ildaran dhibaatooyinka dhimirka. La tashiga ilmi nafsiyeedka, sidoo kale waxaa loogu talagalay ilmaha 0 ilaa 6 jir iyo qoysaskooda, iyo dumarka uurka leh oo lakulma dhibaato iyo saygooda. Xarunta CNP waxey qiimeysaa oo ay sigaar ah udaryeeshaa ilmaha waxeyna bixisaa taageero waalidnimo.

**MOWDUUCYADA LAGA HADLAY**
- → Raaxo la'aan
- → Dhibaatooyinka maskaxda
- → Loobaaro midkasta sida uu yahay iyo baahida uu qabo
- → Taageero waalidnimo
- → La talinta bukaan socodka
- → Baariitan qeybta neerfaha

- → Adeega xarunta Neuchâtelois ee dhimirka waxaa kharashka bixiya ceymiska caafimka LAMal.

**CENTRE NEUCHÂTELOIS DE PSYCHIATRIE – ENFANCE ET ADOLESCENCE**
- → https://www.cnp.ch/soins-et-prestations/enfants-et-adolescents/

**CENTRE DE PSYCHIATRIE COMMUNAUTAIRE DU LITTORAL**
Rue de Vieux-Châtel 18-20
2000 Neuchâtel
- → 032 755 23 11
- → ea-ln.ca@cnp.ch

**CENTRE DE PSYCHIATRIE COMMUNAUTAIRE DE MONTAGNES**
Rue Jardinière 175a,
2300 La Chaux-de-Fonds
- → 032 755 23 51
- → ea-mn.ca@cnp.ch

# XARUNTA NEUCHATEL EE DHIMIRKA, WAXEY LATALISAA LAMAANAHA IYO QOYSKA

**ADEEGAN ANIGA AYUU IQUSEEYAA TUSAALE AHAAN HADDII**
- Aan ubaahnahay caawimaad si aan uqiimeeyo xiriirkeyga iyo tanqoyska
- Aan ubaahnahay inaan sooceliyo qiimaha nolosheyda ay laheed

La tashiga qoyska iyo lamaanaha waxey bixiyaan wadahadal kusaleeysan lamaanaha iyo qoyska si ay uga caawiyaan una soonooleeyaan noloshii quruxda badneed ee qoyska heystay. Mararka qaar waxaa dhacda oo kaliya inaad ubaantahay micno uyeelid ama fahan xaalada reerkaaga ama lamaanaha, haka labalabeyn inaad caawin weydiisato. Talosiinta laxiriirta gacan qaadka qoyska dhexdiisa sida dilka oo kale hadey jirto waaad lasoo xiriiri kartaa.

**MOWDUUCYADA LAGA HADLAY**
- Lamaanaha
- Qoyska
- Raaxo la'aan
- Daaweynta lamaanaha
- Daaweynta qoyska

**CENTRE NEUCHÂTELOIS DE PSYCHIATRIE**

Préfargier, bâtiment B

2074 Marin-Épagnier
- 032 755 14 68
- cf-in.consultation@cnp.ch

**CENTRE DE PSYCHIATRIE COMMUNAUTAIRE DES MONTAGNES**
Rue Jardinière 157a,
2300 La Chaux-de-Fonds
- 032 755 24 51
- cf-in.consultation@cnp.ch

# XARUNTA NEUCHÂTEL DHIMIRKA, HAGIDDA DHALAANKA

**ADEEGAN ANIGA AYUU IQUSEEYAA TUSAALE AHAAN HADDII**
- Ilmaheyga uu jiro da'da udhaxeysa 0 ilaa 6 jir
- Aan u baahanahay inaan lakulmo dad kutaqsuusay shaqadaan
- Aan ubaahnahay talo laxiriirta korniishaha dareen iyo bulsho ilmaheyga

Qeybta hagida caruurta waa qaab dhismeed bukaan-socodka caruurta yaryar, waalidiintooda, ehelkooda loogu talagalay. Asal ahaan waxaa loo isticmaalaa in lagu wanaajiyo laqabsiga carruurta iyo ehelkooda ayadoo diirada lasaaraayo gaar ahaan xiriirkooda saameynta leh iyo kuwa bulshada.Qeybtan shaqadeedu waxey tahay baadhista,qiimeynta iyo maareeynta dhibaatooyinka carruurta iyo waalidkood : tani waxaa laga yaabaa iney quseeyso khalkhal xaga luuqada ah, kafiirsashada,laqabsiga dhaqanka ama xitaa dhibaatooyinka laxiriira waalidnimada

**MOWDUUCYADA LAGA HADLAY**
- Daryeelka bukaan-socodka
- Magac uyeelid
- Kawarqab
- Hormarinta dareenka maskaxda
- Uurka
- Uurka kadib
- Waalidnimada
- Cilladaha luqadda
- Dhibaatooyinka dabeecada
- Ciladaha laqabsiga
- Cabsi
- Cuqdad
- Awood sare dhinaca waxbarashada (HP)

- Adeegaan waxaa bixiya caymiska caafimaadka

**UNITÉ DE GUIDANCE INFANTILE, CNP**
- https://www.cnp.ch/soins-et-prestations/enfants-et-adolescents/guidance-infantile/

**LE LOCLE ET LA CHAUX-DE-FONDS**
Consultation ambulatoire des Montagnes
- 032 755 23 51

**NEUCHÂTEL ET COUVET**
Consultation ambulatoire du Littoral
- 032 755 23 11

# CSP NEUCHÂTEL, LATALINTA GUURKA IYO QOYSKA

**ADEEGAN ANIGA AYUU IQUSEEYAA TUSAALE AHAAN HADDII**
- → Waxaa ubaahnahay talo kusaabsan  qoyska reerkeyga
- → Waxaan ubaahnahay inaan helo dheelitirka qoyska

CSP Neuchâtel waxey bixisaa talooyin laxiriira qoyska iyo dadka isqaba qofkastana wey ufuran tahay. Waxa ay suurto gal ka dhigtaa in lawahadlo oo lala tashado dadka aqoonta u leh,si xal loogu helo mashaakilada lasoo gudboonaada, ha ahaato mid khuseysa dhibka wada hadlak iyo imaatinka ilmaha, noloshada galmada ama dhibaato kale. Talo siinta waa mid qarsoodi ah cidna lala wadaageyn, kaligaa baa imaan kara ama ninkaaga ayaad la imaan xitaa taleefan ahaan waa macquul.

**MOWDUUCYADA LAGA HADLAY**
- → Xiriirka
- → Nolosha dhabta ah ee lamaanaha
- → Nolosha galmada
- → Ilmaha markaa dhasha
- → Nolol maalmeedka
- → Qoysaska heysta ilmaha aan wada dhalan
- → Kala maqnaansho
- → Dagaal gacan qaad ama maskaxiyan

**CSP NEUCHÂTEL**
- → 032 886 91 00
- → csp.neuchatel@ne.ch
- → www.csp.ch/neuchatel/services/questions-de-couple

**PERMANENCE TÉLÉPHONIQUE**
- → 0840 420 420
- → www.permanencecouplefamille.ch

# CILMI-NAFSI, CILMI-NAFSI-YAQAANADA DAAWEEYA

**ADEEGAN ANIGA AYUU IQUSEEYAA TUSAALE AHAAN HADDII**

- → Mararka qaarkood waxaa dareemaa culeys badan ilaa malintii aan dhalay
- → Ilmaheyga wuxuu ka cabanayaa dhib  maskixiyan ah
- → Qoyskeyga dhib ayaa heysta waxaan ubahanahay caawin

Dhaqtarada cilmi-nafsiga iyo kuwa usheekeeya dadka buufiska qaba waxey lahadlaan dadka qaba dhibaatooyinka nafsaaniga qaba.Waxey wax kaqabtaan si ay udhowraan, u ilaaliyaan ama u wanaajiyaan tayada nolosha bukaanka, hormariyaan awoodooda ama kor uqaadaan isdhexgalka bulshada. Daaweeeynta ay bixiyaan cil-mi-nafsiga waxey uqeyb santahay noocyo badan tasoo laxiriira sababo kala duwan: xanuunada dhimirka (cabsida, niyad jabka, walaaca iwm.), waxkasta oo kugu adag, niyad jab xaga dareenka, hami la'aan  iyo  sababo kale oo badan. Qiimeyn cilmi-nafsi iyo mid baaritaan ayaa lagu siin iyo caawin maskaxeed adigoo lakulmayo dhaqtar ku shaqo leh qebta maskaxda si aad ugala hadashid dhibkaaga.

**MOWDUUCYADA LAGA HADLAY**

- → Dhibaatooyinka nafsiga
- → Arimaha dhaqanka
- → Khalafsanaa
- → Galmada
- → Geeri
- → Dhibaatooyinka maskaxda (niyad jab,cuq-dad, walaac, cunto xumo,iwm.)
- → Caawin waalidiinta
- → La sheekeysi lamaanaha iyo qoyska

**ANPP, ASSOCIATION NEUCHÂTELOISE DES PSYCHOLOGUES ET PSYCHOLOGUES-PSY-CHOTHÉRAPEUTES**

- → info@anpp.ch
- → https://www.anpp.ch/

Caymiska caafimaadka ayaa bixiya xaaladaha qaarkood , waa lasii balaarin wixii kabilawda sanadkan 2022 wixii kusaabsan dhaqaatiir-ta maskaxda iyo kuwa bukaanka usheekeeya. Wixii faahfaahin intaa siidheer weydii qolada kashaqeysa qeybtan

# PSYCHIATRES ET PÉDOPSYCHIATRES

**ADEEGAN ANIGA AYUU IQUSEEYAA TUSAALE AHAAN HADDII**
- → Aan dareemo culys tan iyo markaan dhalay ilmahan
- → Aan ka welwelo korniishaha ilmaheyga
- → Ilmaheyga uu qabo dhib xaga maskaxda
- → Aan qabo xanuun maskaxda

Dhaqaatiirta cilmi-nafsiga ee caruurta waxey si gaar ah ula macaamilaan caruurta.Marka ilmuhu yaryahay,wuxuu lakulmi karaa dhibaato xaga hormarinta madax banaanida iyo xiriirka uu la leeyahay dadka kale, qaasatan marka uu kacsan yahay ama xanaaqsan yahay. Sidee loo caawin karaa markuu xaalada noocaana kujiro? Iyaga uu taageero kahelaya kooxaha hagidda ilmaha,kuwaas oo u fiirsada hormarka dhanka caafimaadka,cilmi-nafsiga,xidhiidhka iyo dhinacyada bulshada. Dhaqaatiirtan ayaa ogolaansho heysto iney daawo qorikaraan hadii loobaahdo.

**MOWDUUCYADA LAGA HADLAY**
- → Dhibaatooyinka maskaxda
- → Dhibaatada habdhaqanka
- → Khalafsanaan
- → Cabsi
- → Cuqdad
- → Niyad jab
- → Ogaanshaha jirada
- → Daawo

**CINWAANADA DHAQTARADA MASKAXDA EE GOBOLKA NEUCHÂTEL**
- → http://www.snm.ch/index.php/component/comprofiler/userslist/36-liste-psychiatrie

Waxaa bixinkara caymiska caafimaadka. Weydii dadka kushaqada leh wixii intaa dheer.

# WAXKALE

Adeegyada kale ee laxiriira mowduuca waxbarashada,cilm-nafsiga iyo dhibaatooyinka bulsho ee qoyska dhexdiisa ayaa kajira gobolka Neuchâtel. Tani waa kiiska dabagalka degdega ah ee qoyska iyo waalidnimada iyo sidoo kale hagidda waalidka loo wakiishay laanqeyrta-cas ee Croix-Rouge neuchâteloise iyo l'ASAEF ooy bixiso Hay'adda Carrefour. Sadexdan adeegyo ee halkaan kuxusan ee caawinta qoyska waxaa laga helikaraa xafiiska badbaadada caruurta. Haddii aad u baahatid, laxiriir xafiiskan ama dhaqtarka ilmahaaga.

# IN LA IIHAYO ILMAHEYGA IYO CAAWIN AAN UHELO SHAQADA GURIGA

# CROIX-ROUGE NEUCHÂTELOISE, ADEEGA DARYEELKA ILMAHA EE GURIGA

**ADEEGAN ANIGA AYUU IQUSEEYAA TUSAALE AHAAN HADDII**
- Ilmaheyga wuxuu kayar yahay 12 sano
- Waxaan qabaa dhib xaga haynta ilmahe si ku sii meel gaar ah
- Ilmaheyga ayaa jiran,waxaan ubaahnahay in la ii hayo ama anaa xanuunsan

Adeega ilmaha kuhaya gurigooda waxey yimaadaan guriga qoyska hadii ilmaha xanuunsan yahay si waalidka uu u aado shaqadiisa ama uu rabo in laga nasiyo haynta ilmaha xanuun san, ama qaasatan haddii lawaayo  qofkii ilmaha markaa hayn jiray oo imaan waayo.

**MOWDUUCYADA LAGA HADLAY**
- Daryeelka caruurta jiran
- Xalinta heynta degdega
- Daryeelka gurga

**ADEEGA DARYEELKA ILMAHA GURIGA, CROIX-ROUGE NEUCHÂTEL**
- 032 886 88 65
- ged@croix-rouge-ne.ch
- https://croix-rouge-ne.ch/services/garde-enfants-a-domicile/

# CROIX-ROUGE NEUCHÂTELOISE, ILMO HEYNTA

**ADEEGAN ANIGA AYUU IQUSEEYAA TUSAALE AHAAN HADDII**
- → Aa raadinayo xal ilmaha laygu haayo si ku meel gaar
- → Waxaan rabaa qof ilmaha ii haya oo shahaado haysta
- → Waxaan rabaa inaan kor uqaado shaqada dhalin yarada

Adeegaan ayaa wuxuu suuro galiyay, waalidiinta haysta ilmaha kaweyn 3 bilood ay uwacan karaan ururka laanqeyrta-cas si loogu soodiro qof ugu haya ilmaha guri-gooda dhexdiisa shahaadana wata. Dadka ilmaha haya waxaa tababar siiyay laan qeeyrta-bishacas,waxey kaloo tababar kusoo sameeyeen xarunta lagu xanaaneeyo ilmaha. Markey waalidiinta raba in ilmaha loohayo isqoraan ayaa waxaa loodiraa magacyada dadka diyaarka u ah ilmo haynta.

**MOWDUUCYADA LAGA HADLAY**
- → Ilmo-haynta
- → Daryeelka ilmaha caafimaadka qaba

**ADEEGA ILMO-HEYNTA, CROIX-ROUGE SUISSE**
- → 032 886 88 60
- → contact@croix-rouge-ne.ch
- → https://croix-rouge-ne.ch/services/baby-sitting/

# DARYEELKA QOYSASK

## XAFIISKA U QAABILSAN QOYSASKA ILMOHEYNTA IYO MACADKA WAXBARASHADA GAARKA AH (OSAE)

**ADEEGAN ANIGA AYUU IQUSEEYAA TUSAALE AHAAN HADDII**

- → Waxaan rabaa in ilmaha liihayo :
  - → Xarunta xanaanada caruurta: (xanaano iyo aqoon isweydaarsi 0-4 jir) ama kuwa iskuulka gaaray (4-12 jir)
  - → Guriga waalidka ilmaha haya(hooyada ilma malinkii haysa)

L'OSAE Waxa aykormeertaa xanaanooyinka, goobaha waxbarashada iyo qoysaska ilmaha gurigooda kuhayo iyo dhamaan noocyada kale ee daryeelka qoyska. Xanaanooyinka waa goobo bulsheed oo lagu xanaaneeyo ilmaha kuna xanaaneeyaan dad qibrad u leh.

**MOWDUUCYADA LAGA HADLAY**

- → Xarunta xanaanada caruurta
- → Xanaanada wadajirka
- → Xarun-maalmeedka qoyska ilmaha haya
- → Iskuxirka bulshada

**OSAE, HALKAN AYAAD KAHELI CINWAANADA KALADUWAN EE QOOYSASKA HAYNTA CARUURTA**

- → https://www.ne.ch/autorites/DEF/SPAJ/accueil-extrafamilial/Pages/parents.aspx

**ACCUEIL FAMILIAL DE JOUR**

- → 032 717 74 53
- → http://www.mamansdejour.ch

# HELID CAAWIN HADDII GEERI DHACDO

# AS'TRAME

**ADEEGAN ANIGA AYUU IQUSEEYAA TUSAALE AHAAN HADDII**

- → Qoyskeyga uu kujiraa xaalad tacsi ama kala tag
- → Qof qoyskeyga kamid ah ama ani ayaa jiro xun haysaa ama xanuun maskaxiyan

As'trame waxey caawisaa qoysaska geeri qabsato,kalataga waalidka,jiro xun iyo xanuunada kudha maskaxda.Waxey si dhaqsi leh ula soo xiriirtaa qoysaska lakulma xaalad adag, taasoo Qatar ama culeys kunoqon karta mustaqbalka caruurta Caawintooda waa waqti go'an ,waxey ku saleysantahay hab ka qeybqaadasho iyo hal abuur.

**MOWDUUCYADA LAGA HADLAY**

- → Caawin
- → Kawar qab
- → Tacsi
- → Kalataga qoyska
- → Jiro
- → Jiro maskaxiyan

**AS'TRAME NEUCHÂTEL**

Rue Louis-d'Orléans 21
2000 Neuchâtel

- → 079 704 90 07
- → https://www.astrame.ch/neuchatel.html

# AGAPA SUISSE-ROMANDE

**ADEEGAN ANIGA AYUU IQUSEEYAA TUSAALE AHAAN HADDII**
- → Ilmo iga dilmeen
- → Aan rabo caawin geeri hadey dhacdo

Agapa Suisse-Romande waxey siisaa taageero dadka geeri kudhacdo sida hooyada ilmaha kadilmaan inta aysan dhalan ama kadib. Geerida mararka qaar waxey sookicisaa dhib mar hore kugu dhacay sida ilmo nimadaadii wixii kusoo gaaray : ururkan wuxuu bixiyaa taageero qaas ah taasoo loogu talagalay dadka dhibkaan heysto. Waxey bixisaa meel lagu hadlo, la isugu yimaado la isku dhageysto ayadooo aqoonsaneysa  qofkasta dareenkiisa. Waxey kaloo dhiibtaa taageero sida wareysi shaqsi ah, ama lamaane ah. Koox koox ah,si looga hadlo xanuunka markaa hooyada ilmaha ka dilmeen.

**MOWDUUCYADA LAGA HADLAY**
- → Caawin
- → Kawarqab
- → Murugada ilmaha dilma
- → Badbaadinta ilmaha uurka kujira
- → Dhaawaca ilmo nimada

- → 077 521 54 00
- → info@agapa-suisseromande.ch
- → www.agapa-suisseromande.ch

# NOTRE PETITE PARENTHÈSE

**ADEEGAN ANIGA AYUU IQUSEEYAA TUSAALE AHAAN HADDII**
- → Ilmo iga dilmeen
- → Dhib aan ku qabno inaan ilmo dhalno
- → Aan rabo caawin ama talo

Ururka Notre petite parenthèse waxey bixisaa hadal wadaag ku saabsan mowduucyada murugada umusha iyo dhalmo la'aanta. Waxey bixisaa meel iyo waqti si ay awood ama xoriyad leh ay ugu kulmaan qibradahooda ay isgu dhaafsadaan dadka dhibkaan soomaray si kalsooni leh. Xitaa mahan dadka dhibka kudhacay oo kaliya iney wada hadlayaan ee waxaa kaqeyb qaadanayaa dada qibrad uleh dhibkaan oo talooyin bixinaya.

**MOWDUUCYADA LAGA HADLAY**
- → Hadal isweydaarsi
- → Taageero
- → Dhageysi
- → Murugada dhiciska
- → Rabitaanka ilmo dhalista
- → Dhalmo la'aan

- → 079 500 74 13
- → nopetitepa@gmail.com
- → www.notrepetiteparenthese.com

# XAALAD ADAG JIRTO

# HADI DHIB JIRO WAC LAMBARKAN 144

**ADEEGAN ANIGA AYUU IQUSEEYAA TUSAALE AHAAN HADDII**

→ Ilmaheyga dhaawacmo ama ku arko xaalad aan waligey ku arag
→ Ilmaheyga uu ubaahyahay daaweeyn degdeg ah

→ Lambarka degdega : 144

Lambarkaa 144 waa lambarka lawaco haddii arin degdeg oo caafimmadka laxiriiro dhacdo waxey kuu soodiraayaan ambalaas.Waxaa lawici karaa oo kaliya haddii il-maha qatar kujiro. Waa macquul inaad wacdid lambarkaan haddi ilmo ama qof weyn aad uxanuun sanyahay 144 .

# KHADKA TALEEFANKA

**ADEEGAN ANIGA AYUU IQUSEEYAA TUSAALE AHAAN HADDII**

→ Ilmaheyga uu jiran yahay
→ Ilmaheyga dhaawec yar soo gaaray
→ Dhaqtarka ilma uusan waqti hayn

**QADKA DHAQTARKA ILMAHA**

→ 0848 134 134

Qadka taleefankan wuxuu qaas uyahay ilmaha. Waxaa lawici karaa haddii ilmaha xanuun sanyahay ama dhaawac gaaro dhaqtarkiisana shaqeyneyn.

# AUTRES NUMÉROS D'URGENCE

**SERVICE DE GARDE (MÉDECIN, PHARMA-CIEN, DENTISTE)**

→ 0848 134 134

**CENTRE SUISSE D'INFORMATION TOXICO-LOGIQUE**

→ 145

**OFFICE DE PROTECTION DE L'ENFANT EQUIPE DES MONTAGNES**

→ 032 889 66 45

**OFFICE DE PROTECTION DE L'ENFANT, EQUIPE LITTORAL EST ET VAL-DE-RUZ**

→ 032 889 66 40

# CINWAANO KALE OO MUHIIM AH

# WAKIILKA DHALIYARADA – SPAJ

Doorka wakiilaka dhalinyarada waa iney kor uqaadaan wacyiga iyo wargalinta ku saabsan xaquuqda caruurta, taageerada iyo hagidda dhalinyarada iyo dadka ka shaqeeya goobta iyo isku xirka adeegyada gobolka ee hawlaha dhalinyarada ee kabaxsan manhajka.

Kooxdu waxey bixisaa sidoo kale buug-yar ay ku dheehantahay adeegyada iyo caawinta  waalidiinta ayku caawinayaan xirfadaha ay qabtaan xiliyada fasax dugsiyeedka waxaad kaheli kartaa cinwaankan  www.ne.ch/cataloguefamilles

**SOPHIE NEUHAUS,**
Fbg de l'Hôpital 36
2000 Neuchâtel
→ 032 889 82 46
→ sophie.neuhaus@ne.ch
→ https://www.ne.ch/dej

# CAAFIMAADKA MASKAXDA

SantéPsy.ch waa madal kamid ah gobolada laatiinka oo ku saabsan mowduuca caafimaadka maskaxda : waalidiinta,dhalinyarada, sida daryeelka caafimaadka maskaxdaada ama sida loocaawiyo qof ehelkaaga ah oo madax kaxanuunsan tusaale ahaan.

→ www.santepsy.ch

# L'ÉDUCATION DONNE DE LA FORCE – NEUCHÂTEL

Ururka looyaqaan édf-NE waa shabakad xirfadyaal,isugu jira ururo macadyo kashaqeeya sidii ay utaageeri lahaaayeen waalidiinta gobolka Neuchâtel. Cinwaankooda waa  www.edf-ne.ch asal ahaan waa buug yar, oo wax badan lagu faahfaahiyay ,oo ay kutaxan yihiin erayada muhiimka ah iyo xiriiriyaasha si toos ah aad ugaleyso goobahooda.

→ www.edf-ne.ch

# QORAALKAN WAXAA LOO SOO SAARAY BAAHI LOOQABO

**Ka socota waaxda caafimaadka dadweynaha**
Adeega caafimaadka dadweynaha wuxuu si firfircooni ah uga shaqeeyaa dhinacyo kala duwan oo lagu hirgalinaayo siyaasada caafimaadka gobolka, gaar ahaan kahortaga iyo hormarinta caafimaadka.Xaaladan oo kale,barnaamijyo iyo waxqabadyo kala duwan oo khuseeya caruurnimada ayaa socda.

**SERVICE DE LA SANTÉ PUBLIQUE – OFFICE DE LA PROMOTION DE LA SANTÉ ET DE LA PRÉVENTION**
Rue des Beaux-Arts 13
2000 Neuchâtel
→ 032 889 52 19
→ SCSP.OPSP@ne.ch
→ www.ne.ch/promotionsante

# IYADOO LALA KAASHANAAYO

**Xafiiska daryeelka qoysaska ilmaha haya iyo macadyada waxbarashada gaarka ah (OSAE)**
L'OSAE ujeedadiisu tahay ogolaanshaha,kormeerida iyo latalinta dhamaan macadyada xafiisyada daryeela ilmaha,kuwaa oo meesha degan ama maalinkii jooga,sidoo kale waalidka ilmaha kuhayo gurigooda iyo qoysaska ilmaha loo dhiibo.

**OFFICE DE L'ACCUEIL EXTRAFAMILIAL ET DES INSTITUTIONS D'ÉDUCATION SPÉCIALISÉE (OSAE)**
M. Marc Dunant, chef d'office
Faubourg de l'Hôpital 23-25
2000 Neuchâtel
→ 032 889 66 34
→ www.ne.ch/accueilextrafamilial

**Wakiilka dhalinyarada**
Wakiilka dhalinyarada waxaa loo xilsaaray inuu kor uqaada siyaasada gobolka ee dhaliyarada. Doorkiisu waa in bulshada wacyigaliyo,qaasatan dhalinyarada,xaquuqda ilmaha lana siiyo talo iyo warbixino.

**DÉLÉGUÉE À LA JEUNESSE**
Mme Sophie Neuhaus
Faubourg de l'Hôpital 36
2000 Neuchâtel
→ 032 889 82 46
→ www.ne.ch/autorites/DEF/SPAJ

# NOTES

avril 2022